



JÄRFÄLLA

# DOORASHO ISKUUL

Dooro fasalka barbaarinta  
(förskoleklass) ama fasalka  
7`aad inta u dhexaysa 29  
janaayo iyo 12 ka  
febaraayo!  
[jarfalla.se/skolval](https://jarfalla.se/skolval)



# Hadda waa wakhtigii la dooran jirey iskuulka xilliga dayrta

Waxaad soo gudbineysaa doonitaanka iskuulka aad ilmahaaga u rabtid, ka dibna degmadu waxaa ay isku deyeysaa iney xaqiijiso doonitaankaaga, hadba sidda ay suurtagal u tahay. Ku meeleynta ardayga dugsiga aad dooneysid waxay ku xiran tahay boosaska firaqada ah ee iskuulka.

## Siddaan ayaad u dalbanaysaa

Dalabkaaga waxaad ku soo gudbineysan aalada danabaysan ee (e-tjänsten) taasoo aad ka heleysid hoyga: jarfalla.se/skolval. Si aad u isticmaashid aaladaan ( e-tjänsten) waxaad u baahan tahay saxiixa danabaysan ee (bank-id). Haddii aadan haysan (bank-id) waxaad ka dalban kartaa bangigaaga ama la xiriir qaybta taageerada ee bangiga (support.bankid.com).

## Ka codso boos meesha caruurta tagaan iskuulka ka dib (fritidshem)

Ka codso boos dugsiga xilliga firaqada kuwiina doonaya in aad boos ka codsataan xarunta dugsiga ka dib ilmahaaga fasalka xannaanada, waxaad sidaa sameeyneysaa Bisha Maay/Juun marka aad hesho go, aanka meelaynta dugsiga ilmahaagu waxa uu ima doonaa illaa dayrta 2024 ka. Macluumaadku waxa ay ku jiri doonaan go,aanka meelaynta.

## Boos ka dalbo fasalada muusikada (musikklaser) ee degmada Järfälla

Haddii ilmahaagu doonaayo inuu dhigto fasalada muusikada ee degmada Järfälla, waa inaad dalabka kusoo gudbisaa aalada (e-tjänsten). Fasalada muusikada ee Järfälla waa ilaa fasalada 4-9 waxayna ku meeleysan yihiin dugsiga (Fjällensskolan)

## Dalbo iskuulada sidda gaarka ah loo leeyahay (fristående skola)?

Ma dooneysaa in ilmahaagu dhigto iskuul si gaar ah loo leeyahay ama iskuul ka baxsan kuwa degmada ? kolkaa waa inaad iskuulkaas si toos ah ula xiriirtaa.

Haddii aad ogtahay in ilmahaagu aanu dhigan doonin iskuulka degmada Järfälla, waa inaad fasaxdaa booska uu ilmaahagu ku leeyahay uskuulka degamda si loogu casumo arday kale.Taas waxaad ka samayn kartaa aalada dalabka ee danabaysan (e-tjänsten).

## Maxaa dhici doona kolka aad codsiga gudbisid?

### Jawaab in ardaygu boos ka helay iskuulka

Bisha Afraad ee April waxaad naga heli doontaan go,aanka ku saabsan meelaynta booska dugsiga. Doorashada dugsigameelayn toos ah ayeey khuseeysaa. Taas macnaheedu waxa weeye marka aad hesho go,aanka meelaynta dugsiga, waa diyaar oo uma baahnid inaad mar labaad xaqiijiso inaad rabto booska.

Haddii aadan ku qanacsanayn meelayntaada dugsiga, waxaad codsan kartaa inaad beddelato ama beddesho dugsiga, inta lagu guda jiro mid ka mida xilliyada isbeddelka dugsiyada (Dugsigeena).

Fadlan la socio in dugsiyada maddaxa banaan ay ku bixin karaan macluumaadka ku saabsan goobta dugsiga waqtiyo kala duwan.

## Siddaan ayaa boosaska iskuulka loo qaybiyaa

Hadba sida ay suurtagal u tahay waxaan isku dayeynaa in aan ilmahaaga ku meeleyno iskuulka ugu horeeya ee aad doorateen.Haddii aan ilmahaagu soo gelin doorashadiisa kowaad, waxaa degmadu ilmaha ku meeleynaysaa doorashada iskuulka labaad, sidaas ayey ku soconeesaa..

Qaabka loo qaadanaayo ardayda fasalka barbaarinta (förskoleklass)



1. Ardayga leh jinsiyad qarsoon (skyddad identitet)
2. Arday walaalahood dhigtaan (waxay quseysaa walaalaha dhigta fasalada 1-3' aad ee iskuulkii aad dooneyseen, bilowga xilliga dayrta, ardayda isku ciwaanka ah ayaa la isu tixgeliyaa kolkii ilmaha laga hormarinaayo caruurta kale)
3. Arday doonaaya
  - ku meeleynta iskuulka iyo
  - arday aan soo gudbin inuu boos ka doonayo iskuulka , laakiin la qiyaasayo inuu iskuulkaas dhiganayo maadaama deegaankiisu u dhow yahay.
4. Arday ka socda degmo kale

Qaabka loo qaadanaayo ardayda fasalka 7 àad

1. . Ardayga leh jinsiyad qarsoon (skyddad identitet)
2. Arday doonaaya
  - ku meeleynta iskuulka iyo
  - arday aan soo gudbin inuu boos ka doonayo iskuulka , laakiin la qiyaasayo inuu iskuulkaas dhiganayo maadaama deegaankiisu u dhow yahay
3. Arday ka socda degmo kale

## Haddii boosasku aanay deeqeynin ardayda

Haddii arday badan ay soo wada dalbadaan hal iskuul, dhamaan ma heleyaan boos.Waxaa la isticmaali doonaa nidaam ama qaab la yiraahdo sharciga dhowaanta si loo kala saaro ardayda. Taas macnaheedu waxa weeye waxaa la tixgeliyaa ardayda deegaankiisu u dhow yahay iskuulka uu soo dalbaday.Waxaa la eegayaa ciwaanka uu ilmuhu ku qoran yahay ama ka diiwaangashan yahay ama jidka ugu dhow ee uu iskuulka u mari karo.




Yoolku waxaa weeye in ardaygu uu iskuulku ka fogeeyn. Waxaad sharciga dhowaanta aad ka akhrisan kartaa hoyga jarfalla.se/skolval

**Haddii aad rabtid inaad u soo guurtid Järfälla**  
Qof cusub oo soo guurey miyaa tahay? Ma dooneysaa inaad hesho sanduuq leh aalada danabaysan ( e-tjänsten) si aad boos ugu dalabtid ilmaha. La xiriir xafiiska adeega bulshada (servicecenter) [kontakt@jarfalla.se](mailto:kontakt@jarfalla.se) ama wac 08-580 285 00

### Haddii aadan dalban wax iskuul ah

Degmada ayaa masuul ka ah dhamaan ardayda uu saaran yahay waajibaadka iskuulka ee ka diiwaan gashan degmada. Waa iney helaan iskuul. Haddii aadan gudbin dalab iskuul, kolkaa waxaa ardaygu boos ka helayaa iskuulka ugu dhow halka ardaygu degan yahay. Iskuulka ugu dhow meesha ardaygu degan yahay ayaa noqonaya iskuulka uu ardaygu boos ka helo. Ka eeg warbxinta hoyga jarfalla.se/skolval.

### Taariikh muhiim ah



# Ma dooneysaa inaad warbixin dheeraad ah ka ogaatid iskuulada?

Kolkaas si niyad ah ayaan kuugu soo dhoweyneynaa kulan warbixineedkayaga 15-26 janaayo. Ka eeg warbxinta hoyga [jarfalla.se/skolval](http://jarfalla.se/skolval).

## Kommunala skolor

Degmada Järfälla waxay leedahay ilaa 22 iskuul, kuwaasoo ah iskuulo degmo. Waxaan ka shaqeyneynaa in natiijada iskuuladu mar walba sii wanaagsanaadaan, iyadoo xooga la saarayo arrimaha nabadgelyada iyo deganaanta waxbarashada. Si loo hubiyo horumarka waxbarashada iyo qaab tacliimeedka.

Ka eeg warbixin dheeraad ah ee ku saabsan iskuuladayada. [jarfalla.se/grundskolor](http://jarfalla.se/grundskolor)

## Fristående skolor

Degmada Järfälla waxaa ku yaal saddex iskuul oo si gaar ah loo leeyahay, kuwaasoo ku yaal Jakobsberg. Iskuuladaasi waxaa ay nidaam waxbarasho gaar ah oo kala duwan tusaale ahaan hab tacliimeedka montosooriga (montessoripedagogik) iyo waxbarasho ku baxda afka ingiriiska

Iskuulka lagu magacaabo (Montessoriskolan Växthuset) fasalada F-6: [ahavaxthuset.se](http://ahavaxthuset.se), [info@ahavaxthuset.se](mailto:info@ahavaxthuset.se) ama soo wac 08-580 275 00

Iskuulka la yiraa (Vittra Jakobsberg,) fasalada F-9: [jakobsberg@vittra.se](mailto:jakobsberg@vittra.se) ama soo wac 08-584 105 90

Iskuulka caalamiga ee Ingiriiska (Internationella Engelska Skolan Järfälla), fasalada 5-9: [jarfalla.engelska.se](http://jarfalla.engelska.se), [info.jarfalla@engelska.se](mailto:info.jarfalla@engelska.se) ama soo wac 08-584 306 30.

## Warbixin luuqado kala duwan

Tietoa omalla kielelläsi: [jarfalla.se/skolval](http://jarfalla.se/skolval) tai soita palvelukeskukseen 08-580 285 00.

Information in your language: [jarfalla.se/skolval](http://jarfalla.se/skolval) or call Servicecenter, phone number 08-580 285 00.

Haddaad doonayso warbixin dheeraad ah halkan kala xirri: [jarfalla.se/skolval](http://jarfalla.se/skolval) ama wac Servicecenter 08-580 285 00.

ካብ ራሱ ብቋንቋኹም ኣብ : [jarfalla.se/skolval](http://jarfalla.se/skolval) ወይ ብቋጽሪ ስልኪ ናብ ኣገልግሎት ማእከል 08-580 285 00 ደውሉ።

المعلومات باللغة العربية تجدها على الموقع الإلكتروني التالي [jarfalla.se/skolval](http://jarfalla.se/skolval) أو يمكنك الاتصال على خدمة الزبائن 08-580 285 00

اطلاعات به زبان شما : [jarfalla.se/skolval](http://jarfalla.se/skolval) یا مرکز خدمات تلفنی 08-580 285 00